



Abaa Mundirow, ma og tahay aayada ugu wayn kitaabka Ilaahay ee aad hayso?) wuxuu yiri: waxaan iri: { 255: البقرة } [البقرة: 255]. wuxuu yiri: laabtuu igu dhuftay, wuxuuna yiri: Abaa mundirow Ilaahay cilmi ayuu kuu hibeeyey)

Ubayya Binu Kacab Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: (Abaa Mundirow, ma og tahay aayada ugu wayn kitaabka Ilaahay ee aad hayso?) wuxuu yiri: waxaan iri: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa og. wuxuu yiri: (Abaa Mundirow, ma og tahay aayada ugu wayn kitaabka Ilaahay ee aad hayso?) wuxuu yiri: waxaan iri: { 255: البقرة } [البقرة: 255]. wuxuu yiri: laabtuu igu dhuftay, wuxuuna yiri: Abaa mundirow Ilaahay cilmi ayuu kuu hibeeyey).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabiga scw wuxuu waydiiyey Ubaya Binu Kacab aayada ugu wayn kitaabka Ilaahay, jawaabtii wuu ka laalaabtay ka dibna wuxuu yiri: waa aayatul-kursiga: { الله لا إله إلا هو الحي القيوم }, Nabiguna wuu ku ayiday, wuxuuna Nabigu scw ku dhuftay laabtiisa isago u ishaaraya inay ka buuxdo cilmi iyo xikmad, wuxuuna ugu duceeyey inuu ku liibaano cilmigaan Ilaahayna u fududeeyo.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65059>

